

JABTO

Jabtadu waxay kamid tahay cudurrada galmada oo lagu kala qaado isu-galmoodka, marka ay istaabtaan xubnaha galmada ama xubnaha galmada iyo xuubka afka ama futada. Infekshinkan aad baa la isaga qaada waxaana keena bagteeriyada Gonokokken. Gonokokker waxay ku noolyihiin xuubabka xaakada oo badanaaba waxaa laga helaa gudaha xubnaha galmada, kaadimmareenka, futada iyo dhuunta. Bagteeriyada waxay xataa ku fidi kartaa dhiigga iyo xubno kale ee oogada oo ay u keeni karto caallir meelahaas. Wakhtigan la joogo Jabtada waa cudur dhif ku ah Norway, laakiin meelo kale ee adduunka ah waa uu ku badan tahay.

Cinjirka raggu gashado (kondom) oo si sax ah loo isticmaalo wuxuu ka hortagayaa qaadista cudurka, cinjirkaas waa in la xirnaadaa inta ay galmada socoto oo idil.

CALAAMADAHA

Ragga badankiis waxay calaamadaha jabtada dareemaan maalin ilaa labo maalmood keddib marka ay qaadeen, ama toddobaad gudihiis. Waxaa la dareemaa olol marka la kaadinayo iyo dhacaan ka soo baxa kaadimmareenka, waa dhacaan badan badanaaba. Ragga marka laga hadlo cudurka jabtadu wuxuu ku fidi karaa kiishka shahwada kaasoo keena madhaleysnimo.

Dumarkana waxay dareemi karaan calaamadaha ragga oo kale, oo ay u dheertahay dhacaan ka soo baxa xubinta galmada. Calaaduhu waa ka laciifsanyihiin oo badanaaba si cad looma garto. Dumarka waxaa xataa ku dhici kara dhiigbax aan caadi ahayn. Marka la eego dumarka Jabtadu waxay ku fidi kartaa marinka ukunta oo ay keeni kartaa madhaleysnimo.

Haddii qof dumar ah ay qabto Jabto marka ay foolaneyso, waxaa ilmaha ay dhalayso ku dhici kara infekshinka indhaha. Ilmaha dhashay haddii aan dhaqso looga daweyn Jabtada waxay dhowr maalmood gudahood.u keeni kartaa indhabeel

BAARITAAN

Tijaabada Jabtada waxaa lagu qaadaa qori cudbi caaradda ku leh oo lagu soo tiro kaadimmareenka iyo dhuunta ilmagaleenka, haddii loo baahdana dhuunta iyo futada. Waxaa la qaadaa tijaabooyin la beero oo loo diro sheybaarka.

DAWEYNTA

Jabtada waxaa lagu daweyyaa Antibiyootiko. Toddobaad ama laba toddobaad keddib waxay dadka oo idil u soo noqdaan kontorool . Waxaa la qaadayaa tijaabo sheybaar oo cusub, tijaabooyinkana waxay muujinayaan inaad caafimaadday.

Qofku waa inuusan galmo sameyn ilaa laga kontoroolo oo lagu caddeeyo inuu caafimaad qabo.

BAARITAAN IYO DAWEEYN BILAASH AH

Jabtadu waxaa lagu magacaabay sida cudur la iskaqaado ee guud ahaan khatar ah, sida uu qabo sharciga maadinta isqaadsiinta. Tan waxaa ku hoos jira xaqa ah bilaash ku baaridda iyo ku daweynta. Waa muhiim in la wargeliyo saaxiibkaaga hadda iyo kii horeba oo loo sheego in cudurka la qaaday.

Takhtarka iyo qofka bukaa waa iney kawada shaqeyaan iney raadraacaan cudurka iyadoo ay dantu tahay in la baaro oo la daweyyo ciddii lala yeeshay xiriir galmo oo laga yaabo in la qaadsiyay.